

## Qorshaha dib u furid oo tartiib-tartiib ah

Qiimayn guud oo ku salaysan qodobbo gaar ayaa la samaynayaa ka hor inta aan heer kale oo debcin ah loo gudbin.

Heerarka tallaabooyinka ee ku jira khaanadaha ayaa sharraxaya xeerarka jira kaddib marka tallaabooyin la debciyo.

Inkastoo la debciyo tallaabooyinka heerka qaran ah, waxa laga maarmi doonin in dilaacitaanka cudur ee maxalliga ama heer gobol ah lagula dagaallamo tallaabooyin maxalli ah ama heer gobol ah.

Waxa lagama maarmaan noqon kara in wax laga beddelo heerarkan, waxaana dhici karta in laga maarmi waayo in dib loo adkeeyo tallaabooyinka inkastoo lagu jiro muddada dib-u-furidda bulshada.

Debcinta tallaabooyinka waa in lala xiriiriyo shahaadada koroonaada iyo tijaabo-qaadista wadareed oo iman kara.

Qaybta	Qorshaha dib u furid ah tartiib-tartiib			
	Heer 1 (heer diyaarin ah)	Heer 2	Heer 3	Heer 4
<b>Xannaanooyinka caruurta, iskuullada iyo SFO</b>	Ku dhaqanka habka midabyada casaan-huruud-cagaar iyo go'aannada maxalliga ah.	Ku dhaqanka habka midabyada casaan-huruud-cagaar iyo go'aannada maxalliga ah.	Ku dhaqanka habka midabyada casaan-huruud-cagaar iyo go'aannada maxalliga ah.	Ku dhaqanka habka midabyada casaan-huruud-cagaar iyo go'aannada maxalliga ah..
<b>Jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyada</b>	Waa la joogi karaa goobta waxbarashada haddii la xoojiyo tallaabooyinka ka hortagga cudurka. Waa la isticmaali karaa qolalka akhriska iyo maktabadda. Waxa wacan in la iska dhafo cashar-bixinnada iyo isu-imaanshooyinka ay dad badan joogayaan, waa la fulin karaa cashar-bixin la siinayo koox kooban.	Kordhinta cashar-bixinnada goob-joogista ah. Kordhinta tijaabo-qaadis la joogtaynayo.  Diiwaangelinta dadka jooga iyo kursiga ay fadhiyaan si loo fududeeyo raad-raaca cudurka.	Kordhinta cashar-bixinnada goob-joogista ah  Diiwaangelinta dadka jooga iyo kursiga ay fadhiyaan si loo fududeeyo raad-raaca cudurka	Tallaabooyinka guud ee ka hortagga cudurka.
<b>Ciyaaraha dadweynaha iyo firfircoonida waqtiga bannaan</b>	Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno waa ay ka qaybgeli karaan tababar iyo firfircoonida waqtiga bannaan. Waxa laga dhaafay xeerka 1 mitir.	Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno waa ay ka qaybgeli karaan qabanqaabooyin isu keenaya ka qaybgalayaal ka	Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno waa ay ka qaybgeli karaan qabanqaabooyinka ka dhacaya gudaha iyo dibeddaba iyadoo loo kala gudbi karo xuduudaha degmooyinka. Inta tirada ka	Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno: inta tirada ka qaybgalayaasha noqon

	<p>Ugu badnaan 10 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka aan lahayn boosas la fadhiisto oo joogto ah oo loo tilmaamayo qofka, laakiin haddana ilaa 50 qof ayaa ka qaybgeli karaa qabanqaabo ciyaareed oo isu keenaysa ka qaybgalayaal ka yar 20 sanno oo ka wada tirsan hal degmo.</p> <p>Ugu badnaan 100 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka leh boosas la fadhiisto oo joogto ah loona tilmaamayo qofka.</p> <p>Marka dibedda lagu qabanayo waxa xadku yahay 200, laakiin waxa la oggol yahay 3 kooxood oo joogto ah oo mid kasta yahay ugu badnaan 200 qof haddii ay fadhiyaan boosas joogto ah oo loo tilmaamay isla markaana labo mitir u dhexeeyaan kooxaha.</p> <p>Haddii carruur iyo dhallinyaro ku tababarato degmo kale, waa loo oggol yahay in ay tartannada kala qaybgalaan koox-ciyaareedkaas haddii xaaladda faafitaanka cudurku saamaxayso.</p> <p>Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno ee sameeya firfircooni aan la isu dhawaanaynin, waxa ay ka qaybgeli karaan qabanqaabooyin isu keenaya ka qaybgalayaal isku hal degmo-</p>	<p>wada tirsan hal degmo oo ay joogayaan ugu badnaa 100 qof (intooda badan tahay carruur iyo dhallinyaro) oo gudaha lagu qabanayo. Dadka waaweyn waxa lagula talinayaa in aanay samayn firfircooni abaabulan oo ay joogaan wax ka badan 20 qof kana dhacaya gudaha ama dibedda.</p> <p>Dadka waxa lagu dhiirigelinayaa in firfircoonida dibedda lagu samaynayo la doorbido oo la iska dhaafo kuwa gudaha.</p>	<p>qaybgalayaasha noqon karto waxa lagu salayn doonaa hadba xaaladda jirta.</p> <p>Dadka waaweyn: inta tirada ka qaybgalayaasha noqon karto waxa lagu salayn doonaa hadba xaaladda jirta.</p> <p>Dadka waxa lagu dhiirigelinayaa in firfircoonida dibedda lagu samaynayo la doorbido oo la iska dhaafo kuwa gudaha.</p>	<p>karto waxa lagu salayn doonaa hadba xaaladda jirta</p> <p>Dadka waaweyn: inta tirada ka qaybgalayaasha noqon karto waxa lagu salayn doonaa hadba xaaladda jirta.</p>
--	--	---	---	---

	<p>ciyaareed ama gobol-ciyaareed ah marka kala qaybinta juqraafiyadeed laga dhigo gobol-gobol.</p> <p>Dadka waaweyn waxa lagula talinayaa in aanay samayn firfircooni abaabulan oo lagu qabanayo gudaha. Dadka waaweyn waa ay samayn karaa tababbar abaabulan oo ka dhacaya dibedda haddii la kala fogaan karo masaafo wacan.</p>			
<p><b>Is-dhexgalka dadka/guryaha khaaska ah</b></p>	<p>Yaraynta is-dhexgalka dadka. Waxa dadka lagu dhiirigelinayaa in dibedda lagu kulmo, iyo in aan la yeelan marti ka badan 5 qof. Haddii martida oo dhan ka wada timi hal guri waxa la noqon kara dad intaas ka badan, laakiin waa in la kala fogaan karo.</p> <p>Caruurta xannaanooyinka iyo dugsiyada hoose waxa ay is booqan karaan carruurta ka tirsan kooxdooda joogtada ah.</p>	<p>Ugu badnaan 10 qof oo marti ah.</p> <p>Waxa wacan in lagu dhaqmo talada kala fogaanshaha. . Waxa dadka lagu dhiirigelinayaa in dibedda lagu kulmo.</p>	<p>Ugu badnaa 20 qof oo marti ah.</p> <p>Waxa wacan in lagu dhaqmo talada kala fogaanshaha. Waxa dadka lagu dhiirigelinayaa in dibedda lagu kulmo.</p> <p>Si socota ayaa loo eegi doonaa in la debciyo tallaabooyin kale</p>	<p>Tallaabooyinka guud ee ka hortagga cudurka.</p>

<b>Ganacsiga/dukaammada</b>	Waa ay furan yihiin iyadoo lagu dhaqmayo ka hortagga cudurka oo waafaqsan nidaam u gaar ah nooca ganacsiga/meheradda	Waa ay furan yihiin iyadoo lagu dhaqmayo ka hortagga cudurka oo waafaqsan nidaam u gaar ah nooca ganacsiga/meheradda	Waa ay furan yihiin iyadoo lagu dhaqmayo ka hortagga cudurka oo waafaqsan nidaam u gaar ah nooca ganacsiga/meheradda	Tallaabooyinka guud ee ka hortagga cudurka.
<b>Goobaha laga cunteeyo/cabo</b>	Waxa khamriga laga iibin karaa keliya dadka cunto dalbada. Gadista khamriga waxa la joojinayaa saacada 22.00 Xeerarkani waa ay khuseeyaan qabanqaabooyinka.	Soo gelista iyo iibinta khamriga waxa la joojinayaa saacada 24.00. Shuruud maaha in cunto la dalbado. Shuruudaha tallaabooyinka ka hortagga cudurka: Diiwaangelin, tirada martida oo la yareeyo iyo kala fogaansho, gudaha iyo dibeddaba.	Waa la joojinayaa madnucista iibinta khamriga. Shuruudaha tallaabooyinka ka hortagga cudurka: Diiwaangelin, tirada martida oo la yareeyo iyo kala fogaansho, weliba gudaha.	Tallaabooyinka guud ee ka hortagga cudurka.
<b>Shaqooyinka</b>	Guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda.	Guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda iyo/ama in loo debciyo waqtiyada shaqada.	Guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda iyo/ama in loo debciyo waqtiyada shaqada.	Qayb ahaan guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda iyo/ama in loo debciyo waqtiyada shaqada.
<b>Safarrada waddanka gudahiisa</b>	Iska dhaaf safarrada lagama maarmaanka ahayn ee waddanka gudahiisa. Waa la aadi karaa guri-fasaxeed (la leeyahay ama la kiraystay) ama	Safarrada waddanka gudahiisa ah waa la samayn karaa.	Tallaabooyinka ka hortagga cudurka si socota ayaa loo qiimayn doonaa	Tallaabooyinka guud ee ka hortagga cudurka.

	<p>hoteel ku yaalla waddanka, laakiin iska dhaaf gaadiidka dadweynaha haddii aad awooddo.</p> <p>Dadka safar ku aada degmooyin ka tallaabooyin debeansan degmadooda waxa wacan in ay caadi ahaan ku dhaqmaan talooyinka ka jira degmada ay deggan yihiin.</p>			
<b>Qabanqaabooyinka gaarka ah</b>	<p>Ugu badnaan 10 qof marka lagu qabanayo meel guud oo gudaha ah ama rug/meel la kiraystay. Ugu badnaan 20 qof marka dibedda lagu qabanayo.</p> <p>Waxa wacan in dib loo dhigo ama la baajiyo qabanqaabooyinka isu keenaya dad ka tirsan degmooyin kala duwan.</p>	<p>Ugu badnaan 20 qof marka lagu qabanayo meel guud ama rug/meel la kiraystay, gudaha iyo dibeddaba.</p> <p>In qabanqaabada lagu qabto dibedda ayaa ka wacan in lagu qabto gudaha.</p>	<p>Ugu badnaan 50 qof marka lagu qabanayo meel guud ama rug/meel la kiraystay, gudaha iyo dibeddaba.</p> <p>In qabanqaabada lagu qabto dibedda ayaa ka wacan in lagu qabto gudaha.</p>	<p>Waxa loo qiimayn doonaa si socota</p>
<b>Qabanqaabooyinka guud</b>	<p>Ugu badnaan 10 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo</p>	<p>Ugu badnaan 20 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu</p>	<p>Waxa loo qiimayn doonaa si socota</p>	<p>Waxa loo qiimayn doonaa si socota</p>

	<p>gudaha oo aan lahayn boosas la fadhiisto oo joogto ah oo loo tilmaamayo qofka, laakiin ilaa 50 qof ayaa ka qaybgeli kara qabanqaabo ciyaareed oo isu keenaysa ka qaybgalayaal ka yar 20 sanno oo ka wada tirsan hal degmo.</p> <p>Ugu badnaan 100 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo gudaha oo leh boosas la fadhiisto oo joogto ah loona tilmaamayo qofka.</p> <p>Ugu badnaan 200 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo dibedda, laakiin waxa la oggol yahay 3 kooxood oo joogto ah oo mid kasta yahay ugu badnaan 200 qof haddii ay fadhiyaan boosas joogto ah oo loo tilmaamay isla markaana labo mitir u dhexeeyaan kooxaha.</p>	<p>qabanayo gudaha oo aan lahayn boosas la fadhiisto oo joogto ah oo loo tilmaamayo qofka, laakiin ilaa 100 qof ayaa ka qaybgeli karaa qabanqaabo ciyaareed oo isu keenaysa ka qaybgalayaal ka yar 20 sanno oo ka wada tirsan hal degmo.</p> <p>Ugu badnaan 200 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo gudaha oo qof kasta helayo boos uu fadhiisto oo joogto ah loona tilmaamayo qofka.</p> <p>Qabanqaabooyinka dibedda waxa khuseeya xadka tirada ee heerkii hore.</p> <p>In qabanqaabada lagu qabto dibedda ayaa ka wacan in lagu qabto gudaha.</p>	<p>In qabanqaabada lagu qabto dibedda ayaa ka wacan in lagu qabto gudaha.</p>	
<p><b>Soo gelista/ka bixidda waddanka</b></p>	<p>Waxa lagu talinayaa in la iska dhaafo safarrada dibedda. Waa la samayn karaa safarrada aad u ah lagama maarmaan.</p>	<p>Waxa lagu talinayaa in la iska dhaafo safarrada dibedda. Waa la samayn karaa safarrada aad u ah lagama maarmaan. Weli waxa jira xayiraadaha adag</p>	<p>Safarrada oo la oggolanaayo, laakiin weli waxa jiri doona karantiil iyo tijaabo-qaadis laga rabo dadka waddanka soo gelaya.</p> <p>Weli waxa jiraya xayiraado khuseeya soo gelitaanka waddanka, laakiin waxa la oggolaan doonaa in shaqaalaha ajnabigu</p>	<p>Waxa weli jiri kara xayiraado khuseeya soo gelitaanka waddanka, gaar ahaan khuseeya safarleyda ka imanaysa waddamo saddexaad.</p>

		<p>ee soo gelitaanka waddanka ee lagu soo rogay ajnabiga. Waxa shuruudaha laga debcinayaa kooxo mudnaan la siinayo oo shaqo darteed waddanka u imanaya, waxaana la kordhinayaa fursadaha booqashada qoyska.</p>	<p>u yimaadaan si ku dhow sidii caadiga ahayd.</p>	<p>Waa in lagu xisaabtamo in karantiil ama tijaabo qaadista lagu waajibin karo dadka safar kaga imanaya aagag gaar ah. Waa in iyagana xeerarka khuseeya soo gelista waddanka laga samayn doonaa dib-u-eegis socota.</p>
--	--	---	--	---